


# Kalaay waxay la hadashaa dhirta



✎ Ursula Nafula

🔗 Jesse Pietersen

📁 Abdi Muse

😊 somaliska

📖 nivå 2

(utan bilder)



# Sagor för barn på svenska

[berattelser.se](https://berattelser.se)

## Kalaay waxay la hadashaa dhirta

Skriven av: Ursula Nafula

Illustrerad av: Jesse Pietersen

Översatt av: Abdi Muse

Denna saga kommer från African Storybook ([africanstorybook.org](https://africanstorybook.org)) och vidarebefordras av Sagor för barn på svenska (<https://berattelser.se/>), som erbjuder sagor på många språk som talas i Sverige.

Detta verk är licensierat under en Creative Commons


[Erkännande 4.0 Internasjonal Licens.](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.sv)

<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.sv>




Tani waa Kalaay. Waxay jirtaa toddoba sano. Magaceeda macnihiisa waa “midda wanaagsan” luqaddeeda, Lubukusu.

Kalaay way soo toostaa waxeyna  
lahadashaa geedka liinta ah. "Fadlan  
geedka liinta ahoow, weynoow oo na  
sii liin badan oo bissil."






Kalaay waxay aadaa dugsiga. Jidka waxay kula hadashaa cawska. “Fadlan caws, weynoow cagaaro oo ha qallalin.”




“Liinta weli waa cagaar,” ayay ku neef tuurtay Kalaay “Waxaan ku arki doonaa berrito geedka liintaw,” ayay tidhi Khalaay. “Malaha markaas baad ii yeelan doonto midho liin ah oo bislaaday!”

Kalaay waxay soo martaa ubaxyo duureed. "Fadlan ubaxyo, sii magoola, si aan timaheyga idiin saarto."




Markay kalaay guriga ku laabato, waxay booqataa geedka liinta. "Miyay bisaadeen midhahada wali?" Ayeey weydisaaa khalaay.





Iskuulka, Kalaay waxay la hadashaa geedka dhexda xerada ku yaallo.  
“Fadlan geed, so saar laamo waaweyn si aan ugu akhrisano hooskaada.”



Kalaay waxay la hadashaa bowdka ku wareegsan dugsigeeda. “Fadlan u kora si awoodleh oo joojiya soogallida dadka xun.”